

FAAFIN

الرسمية



RASMI AH

الجريدة

EE JAMHURIAYADDA DIMUQRADICA SOMALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 3aad

Muqdisho, 30 Nofembre 1975

L. 4, R. 11

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

K O O B N I I N

B O G G A K O O W A A D

S H A R C I

- SHARCI L. 79 ee 12 Aprile 1975 — *Beddelaad Sharci lam.*
15 Tr. 25 Jennaayo 1969 iyo 34 Tr. 1da Maarso 1971. Bog. 931
- LEGGE N. 79 del 12 Aprile 1975 — *Emendamento alle Leg-*
gi n. 15 del 25 Gennaio 1969 e 34 del 1 Marzo 1971. » 933
- SHARCI L. 80 ee 6 Nofembre 1975 — *Isbeddelkii 3aad ee*
Miisaaniyadda 1975. » 935
- SHARCI L. 81 ee 9 Nifembre 1975 — *Wax ku kordhin*
Xeerka Habka Jinaaiga ah. » 939

BOGGA LABAAD

X E E R

- XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA-
CAANKA, 6 Nofember 1975, L. 159 — *Abuurt Safaa-
radda Cusub ee laga Furidoono Hafaana.* Bog. 941
- XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA-
CAANKA, 6 Nofembre 1975, L. 160 — *Magacaabid
Danjire Cusub Jaalle G. Sare Yuusuf Xasan.* » 942
- XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA-
CAANKA, 6 Nofembre 1975, L. 161 — *Magacaabid
Danjire Cusub Jaalle Baasi Maxamed Suufi.* » 943
-

BOGGA SEDDEXAAD

TALOOPYIN ISGARSIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

- FIAT SOMALIA 30-11-1975 — *Ogeysiis Shir. 292 Bis* Bog. 944
- MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 3-12-1975 —
*Lumid buugga kaydka kaydka L. 1426-4 So. Shs. 1.015
u leyahay Maxamed Ibraahim Cabdulle. (292 Bis)* » 944
- MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER EE BURCO,
25-11-1975 — *Lumid Jeeg L. 7351 So. Sh. 2.000, ay le-
dahay Faadumo Cali Maxamed. (292 Bis)* » 945

BOGGA KOOWAAD

SHARCI L. 79 ee 12 Abril 1975.

Beddelaad Sharci Lamb. 15 taariikh. 25 Jennaayo 1969 iyo 34 taariikh 1da Maarso 1971.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo ta 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Lamb. 15 aariikh. 25-1-69 iyo beddelaadii ka dambeey — Sharci Lamb. 65 taariikh. 13 Oktoobar 1971 oo ku saabsanaa Xannaanada Xoolaha Dhirta iyo Daaqa.

ISAGOO ARKAY Sharciga Lamb. 34 taarii.kh. 1da Marso 1971 iyo beddelaadii ka dambeeyay oo lagu dhisay Wakaaladda Xirmooyinka ugaarta iyo Dugaaga.

ISAGOO AQOONSADAY Inay tahay lagama marmaan in sharciga oo ku saabsan xannanada Xoolaha, aan cidna laheyn xilka maamulkooda lagu wareejiyo Wakaaladda la tilmaamay iyadoo magaca loo aqoonsanji-rayna wax laga beddelo.

ISAGOO TIXRAACAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU SOO SARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Wakaaladda Xerada Dugaaga Dalka oo lagu dhisay sharciga lamb. yahay 34 taariikh. 1da Marso 1971, hadda ka did waxaa loo aqoonsan doonaa «WAKAALADDA XERYAHA IYO XANNAANADA DUGAAGA IYO UGAARTA» ee Dalka.

Qodobka 2aad

Sharciga ku saabsan Xannaanada Dugaaga iyo ugaarta oo ay ku qoranyihiin Sharciga lamb. 15 taariikh. 25-1-69 iyo beddelaadii ka dambeeyay, waxaa xilka maamulkiisa lagu wareejiyay Wakaaladda sharcigan u tilmaamayo, hirgelinta sharciga wuxuu ka mid noqon doonaa hilmiloo-yinka Wakaaladda.

Wakaaladdu waxay leedahay awood iyo xilka maamulka ama Xannaanada Dugaaga iyo Ugaarta oo xilkooda hayn jirtay Wasaaradda Xannaanada Goolaha Dhirta iyo Daaqa, isla markaas Wakaaladdu waxay noqoneysaa Maamulka Sare ee Xannaadada Dugaaga iyo Ugaadha.

Qodobka 3aad

Wakaaladdu waxay hoos imaanaysaa Madaxtooyada Golaha ee Kacaanka waxaana ay yeelan doontaa qof oo kormeer ah oo ka tirsan Golaha Sare ee Kacaanka lagu magacaabi doonaa Xeer Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka.

Amarada ee Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka oo uu siin karo Wakaaladda ama kormeeraha oo la magacaabay wuxuu noqon karaa fartiin ma amaro oo marka loo baahdo la bixiyo wuxuuna ujeedada amar-kaas yahay inay Wakaaladdu dhawreyso Sharciyada Dalka iyadoo ku shaqeyneyso danaha Wadanka.

Qodobka 4aad

Haddii loo aqoonsado inay tahay lagama maarmaan, waxaa la dhisi doonaa Xiryo Xannaadada Dugaaga iyo Ugaarta Gobolada, iyo taasna waxaa lagu soo dhisi doonaa Xeer Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka isagoo tixgelinaaya talada kormeeraha iyo Agaasimaha Guud ee Wakaaladda.

Qodobka 5aad

Wakaaladdu waxay yeelan doontaa koox oo ilaaliyayaal ah oo asluubta ay ku dhaqmaan u dhigan tahay kuwa Ciidamada oo ku hawl leh ilaalinta Dugaaga meelaha looga baahdo iyo Xirmooyinka.

Qodobka 6aad

Agaasimaha Guud ee Wakaaladda wuxuu xaq u leeyahay ka qeyb qaato Guddiyada iyadoo laga reebay Guddiga dhaqaalaha ee G.S.K. oo Guddigaas ku hawl lahaan doono Xannaanada Dugaaga iyo Ugaarta, isagoo awood loo siiyey inoo wixii talo ka ahna ka bixiyo, markaasta oo Guddida arrimahaas wax ku saabsan go'aan u ku gaari doono.

Agaasimaha Guud ee Wakaaladda waxaa loo xilsaaray inuu heshiis kasta la gali karo Wakaaladda Caalimiga ah, Macaahidka cilmiyada ah, dadka aqoonta leh (studiosi) oo ku shaqo leh Xannaanada Dugaaga iyo Ugaarta isagoo markasta dhawraaya Sharciga Xirooyinka Dugaaga iyo Ugaarta iyo kuwa ku saabsan Xannaanadaoda.

Qodobka 7aad

Wakaaladdu Xirooyinka iyo Xannaanada Dugaaga iyo Ugaarta waxaa la siin doono lacag oo dhan Shs. 1.000.000 (hal milyuun shilin) si ay u hirgeliyo hawlaha loo xilsaaray ee uu qoraayo Sharciga.

Qodobka 8aad

Waxaa la buriyey sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan.

Qodobka 9aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta lagu soo saaro Faa-finta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 12 Abriile 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

LEGGE N. 79 del 12 Aprile 1975.

Emendamento alle Leggi n. 15 del 25 Gennaio 1969 e 34 del 1 Febbraio 1971.

IL PERSIDENTE DEL CONSIGLIO RIVOLUZIONARIO SUPREMO

VISTE la prima e la seconda carta della Rivoluzione del 21 Ottobre 1969;

VISTE La legge n. 15 del 25-1-1969 e successivo emendamento — legge n. 65 del 13 Ottobre 1971 — sulla fauna e per la conservazione dell'obbiettivi.

VISTA La legge n. 34 del 1-3-1971 e successive modifiche relativa alla Istituzione dell'Ente per i Parchi Nazionali;

RITENUTO Necessario a che le norme in atti per la conservazione della fauna selvaggia sia devoluta al sopra menzionato Ente e di conseguenza modificare la sua denominazione;

PRESO ATTO Dell'approvazione del Consiglio Rivoluzionario Supremo e del Consiglio dei Segretari di Stato;

PROMULGA

la seguente legge:

Art. 1

L'Ente per i Parchi Nazionali istituito con legge 1-3-1971 n. 34 avrà ora d'nnanzi la denomizione di «ENTE PER I PARCHI NAZIONALI E PER LA CONSERVAZIONE DELLA FAUNA».

Art. 2

Tutte le norme in atte per la conservazione e per la salvaguardia della fauna selvaggia previste dalla legge 25-1-1969 e successivi emendamenti saranno devoluti all'Ente di cui alla presente legge e saranno fra i suoi obiettivi.

A tale fine l'Ente eserciterà tutti i poteri e le attività relative alla conservazione alla salvaguardia della fauna selvaggia già di competenza del Ministero Zootecnia e Foreste, classificandosi come autorità competente.

Art. 3

L'Ente posto sotto la vigilanza della Prseidenza del Consiglio Rivoluzionario Supremo ed avrà un Supervisore che sarà nominato fra i membri del Consiglio Rivoluzionario Supremo e con Decreto del Presidente del Consiglio Rivoluzionario Supremo.

Oltre alle direttive che il Presidente del Consiglio Rivoluzionario Supremo può dare all'Ente, il Supervisore nominato può dare ogni istruzione necessario e vigilanza a che esso Ente operi in conformità alla legge e nell'interesse della Nazione.

Art. 4

Se e' ritenuto necessario od indispensabile possono essere istituiti Parchi Nazionali o riserve in qualsiasi regione su proposta del Supervisore e del Direttore Generale e con Decreto del Presidente del Consiglio Rivoluzionario Supremo.

Art. 5

L'Ente disporrà di un corpo adeguato di guardie faunistiche militarmente ordinate per il controllo della fauna nei luoghi ritenuti necessari nonche' per le zone protette.

Art. 6

Il Direttore Generale dell'Ente per diritto farà parte di tutte le commissioni — salvo quelle Commissione Economica del Consiglio Rivoluzionario Supremo — che vengono istituite riferentesi alla conservazione dell'ambiente e dalla fauna con facoltà di esporre il suo parere ogni qual volta che si prenderanno decisioni che riguardino la fauna e la sua preservazione.

Il Direttore Generale dell'Ente inoltre avrà il compito di trattative, contatti con qualsiasi agenzia internazionale, istituti scientifici, Università, studiosi ecc. che si interessano sul problema della fauna, sempre uniformandosi alle norme in atto per i Parchi e per la conservazione faunistica.

Art. 7

L'Ente per i Parchi Nazionali e per la conservazione della fauna avrà una dotazione che ammonti a Shs. 1.000.000 (un milione di shellini) per l'inizio dell'attività attribuitale per norma.

Art. 8

E' abrogato ogni norma contraria od incompatibile con la presente legge.

Art. 9

La presente Legge entra in vigore dalla data sulla pubblicazione sul Bollettino Ufficiale.

Mogadiscio, 12 Aprile 1975.

IL PRESIDENTE

del Consiglio Rivoluzionario Supremo
Jaalle Gen. Div. Maxamed Siyad Barre

SHARCI L. 80 ee 6 Nofembre 1975.

Isbeddelkii 3aad ee Miisaaniyadda 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Go'aankii Labada Gole ee 6 Nofembre 1975.

Qodobka 1aad

Isbeddelka lagu sameeyey Miisaaniyadda 1975, sida ka muuqata lifaaqa A iyo B waa la ogolaaday.

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxu dhaqan-gelayaa 6da Nofember, 1975 wuxuuna ka mid noqon doonaa sharciyada Dawladda Soomaaliyeed; waa in lagu qoraa Faafinta Rasmiga ah oo Dawladda.

Muqdisho, 6 Nofembre 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda

Jjaalle Cabdiraxmaan Nuur Xirsi

ISBEDDELKII 3aad EE MIISAANIYADDA 1975

Madax	Madaxige	TILMAAN	Qiyaastii Hore	Isbeddelka	Qiyaasta Cusub
1.1.0.	Cashuurta wax soo saa- ridda iyo kharashka				
	1.1.2.	Cashuurta diridda Alaabta .	. 10,000,000	+ 3,000,000	13,000,000
	1.1.5.	Cashuurta buuriga iyo taraqa	. 54,000,000	+ 6,000,000	60,000,000
	1.1.7.	Cashuurta Moorka 35,000,000	+ 7,000,000	42,000,000
	1.1.8.	Cashuurta Socodka Baabuurta —	+ 1,000,000	1,000,000
10.1.0.	Amaahda	10.1.1. Amaahda Gudaha —	+ 16,000,000	16,000,000
			Isugeyn	+ 33,000,000	

ISBEDDELKII 3aad EE MIISAANIYADDA 1975

Madax	Madaxige	TILMAAN	Qiyaastii Hore	Isbeddelka	Qiyaasta Cusub	
1.1.0. Madaxtooyada GSK	1.1.1.	Mushararka shaqaalaha joogtada ah	3,238,341	+	261,000	3,499,341
1.2.0. Wasaaradda Maaliyadda	3.1.1.	Dhismaha Xafiisyada	—	+	2,600,000	2,600,000
	1.2.8. j)	Bixinta Kharashka Sannadihii hore	—	+	10,000,000	10,000,000
	1.2.8. d)	Kaalmada kaydka ah	10,507,167	+	3,000,000	13,507,167
	1.2.8. r)	Kirsocodka caynta	5,029,785	+	1,700,000	6,729,785
	6.1.0.	Bixinta daynta gudaha	11,686,774	+	3,000,000	14,686,774
	6.2.0.	Bixinta daynta Dibedda	5,093,901	+	500,000	5,593,901
1.5.2. Ciidanka Asluubta	1.2.1. j)	Darka iyo wixii raaca	600,000	+	300,000	900,000
	1.2.1. x)	Batroolka iyo naaftada iyo saliida	220,000	+	260,000	480,000
	1.2.1. kh)	Cuntada	3,600,000	+	3,000,000	6,600,000
	1.2.1. r)	Daabacaada iyo alaabta xafiisyada	100,000	+	100,000	200,000
	1.2.2. x)	Maacuunka	100,000	+	85,000	185,000
	1.2.3. t)	Alaabta deryeelidda baabuurta	150,000	+	130,000	280,000
	1.2.3. x)	Alaabta dhismaha	100,000	+	200,000	300,000
	3.1.1. a)	Dhismaha Xabsiyada	500,000	+	350,000	850,000

Madax	Madaxige	TILMAAN	Qiyaastii Hore	Isbeddelka	Qiyaasta Cusub	
1.6.2. Caadanka Booliiska	1.2.7. b)	Nalka iyo biyaha	290.000	+	260.000	550.000
1.7.0. Wasaaradda H. Guud	3.1.1.	Dhismaha Jidka-Jowhar-Bulo Burte	350.000	+	820.000	1.170.000
1.9.0. Wasaaradda Beeraha	1.2.7. b)	Nalka iyo Biyaha	170.000	+	100.000	270.000
1.12.0. Wasaaradda Warsh.	3.1.1. a)	Mashruuca Faanoole	10.000.000	+	3.000.000	15.000.000
	3.1.1. a)	Warshadda Sibirka	5.500.000	+	1.000.000	6.500.000
	3.1.1. t)	Mashruuca Warshadaha Hargaha	6.220.000	+	700.000	6.920.000
	3.1.1. j)	Warshada cusub ee sonkorta	2.450.300	+	1.000.000	3.450.000
	3.1.1. kh)	Warshadaha yar yar	1.159.700	+	100.000	1.259.700
1.18.0. Wasaaradda Shaqada iyo Tacliinta Sate	1.1.1.	Mushaharka shaqaalaha joogtada ah	851.780	+	54.000	905.780
1.20.0. Wasaaradda Shaqada iyo Isboortiga	3.1.1.	Dhismaha Cusub	—	+	250.000	250.000
1.21.0. Wasaaradda Warfaaf.	3.1.1.	Dhismaha Raadiyaha Muqdisho	300.000	+	230.000	530.000

Isugeyn + 33.000.000

SHARCI L. 81 ee 9 Nofembre 1975.

Wax ku kordhin Xeerka Habka Jinaaiga ah.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaanshida 1aad iyo tan 2aad Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Qodobk 74 ee Xeerka Habka Jinaaiga ah oo ku saabsan oggollasho ka koreysa shaqaale qarkood la qabanaayo;

ISAGOO AQOONSADAY In loo baahan yahay in wax lagu bardihiyo qodobka 74 ee Xeerka Habka Jinaaiga, ah, baaro dembiyadda sii loo daryeelo caddaaladda iyo danta Qaranka;

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo ka Xighayayaasha Dawladda.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Micneyn

Haddii si kale aan loo micneyn ereyada hoos ku qoran waxaa loola jeedaa sida soo sicota:

«Maamul Sare»: Waxaa loola jeedaa qof jago Sare ka haya maamulka dawladda sida Agaasime Guud ama Mareeye Guud, Danjire, Agaasime Waxaed iyo jagooyinka kale ee la siman;

«Laamaha Baarista»: Waxaa loola jeeda Laanta Baarista Dembiyada, Laanta Nabadsugidda Ummadda iyo Xafiiska Hantidhowrka.

Qodobka 2aad

Wax ka beddel Xeerka Habka Jinaaiga ah

Xubinta 1aad ee qodobka 74 ee Xeerka habka jinaaiga ah, waxaa lagu kordhiyay xarafka (c), waxaan loo akhriyi doonaa sida soo socota:

(c) — Haddii eedaysanuhu yahay Maamule Sare waxaa shardi ah in la helo oggolaashada Madaxweynaha G.S.K. ka hor intaan la qabanin ama aan la xirin. Shuruudda xibintan (c) waxaa ka baxsan maamulaha Sare ee eedda loo haaysto oo lagu helo isagoc dembiga faraha kula jira (flagranza).

Qodobka 3aad

Habka Baarista

Iyadoo tixgelinaayo mabd'a caddaaladda, danta Maamulka Guud ee Dawladda iyo Xeerka habka jinaaiga ah waxaa qasab ku ah Laanta Baarista iyo Maxkamadaha marka eedeysanuhu uu yahay Maamule Sare insay raacaan habka soo socda:

- i — Waa in Laamaha Baarista ka gun gaaraan waxyaabaha Maamulaha Sare loo haysto si wax runta ku dhowaankara loogaaro oo dembi noqon kara xagga sharciga;
- ii — Waa in Maxkamadaha, Xafiisyada Xeer Ilaaliyaha, Nabadsugidda, Booliiska iyo Hantidhawrka ka digtoonaadaan inaysan Baarista dembiyaalka lagu tuhmay Maamule Sare u dhicin si foolxumo ah, oo dhibaata ku reebi karta qofka Maamulka haya iyo shaqaalaha;
- iii — Waa in haddii loo baahdo in la su'aalo ninka mas'uulka ah ee la tuhmay hawshaa (baadhista) loo qabtaa intii la kari karo si qarsoodi ah (xafiiskiisa oo loogu tago, amba xafiiska wax baadhaya oo si qarsoodi ah ugu yeedha, su'aalihii loo baahnaana kaga bogta si kashif la'aan ah);
- iv — Madaxda Laanta Baarista ku shaqada leh waa in lala socodsiiyo tallaabooyinka laga qaadaayo Maamule Sare isla markaasna Madaxdaasu waa inay hubiyaan in baaridda dembigu si habsami ah u socoto;
- v — Marka ay u caddaato Laanta Baarista ama xeer ilaaliyaha inuu eedeysanuhu yahay qof dambile ah waa in isla markiiba si rasmi ah oo qoran u weydistaa Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka oggolaanshaha qabashada ee deysanaha iyogoo u sheegaaya sababaha go'aankooda;
- vi — Haddii uu Guddoomiyo Madaxweynuhu go'aanka Laanta Baarista ku shaqada leh, waa in si dhaqso ah loo ogeysiiya Madaxda eedeysanaha la shaqeeyo;
- vii — Waa in xirid kaddib dadka caynikaas ah dacwadda si deg deg ah Ciidanka amba Hay'adda ku shaqa luhu Maxkamadda ugu gudbisaa, iyaduna ay si deg deg ah dacwaddii ku oognayd eedeesanaha u qaaddaa.

Qodobka 4aad

Maxkamadda ku howl leh qaadista dembiga lagu tuhmay Maamule Sare waa in si dhaqso ah ama muddo aan dhaafsancyn qaadista dacwadaha ee u qoraayo Xeerka Habka Jinaaiga ah dacwadiisa ku ay qaadaa, si haddii dembile u yahayna looga oofiyaa xaqa dadweynaha, hadii kalena dhaqso loogu soo celiyo, xornimaddiisa iyo hawsha oo u haayay Maamulka Guud.

Qodobka 5aad

Qof all:le oo ku xadgudba sharciga waxaa loo ictibaaraaya inuu galay, denbi, waxaana logu qaadaaya qodobka 250 ee sharciga Jinaaiga ha.

Qodobka 6aad

Burin Sharci

Wax allaale wixii sharci ah ee ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan waa la baaba shay.

Qodobka 7aad

Dhaqan Gelid

Ssharcigan wuxuu dhaqaa gelayaa 29ka Disheembar 1974, waxaana lagu soo saari doona Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 9 Nofembre 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

BOGGA LABAAD

XEER L. 159 ee 6 Nofembre 1975.

Abuurit Safaaradda Cusub ee Laga Furidoono Hafaana.

MAXDAWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

IYADDO La ARKAY Warqadda 1aad ee Golaha Sare ee Kacaanka oo u wareejineysey Maamulka Sharciga Dawladda iyo Qawaaniinta Dalka;
IYADDO LA ARKAY Sharciga ay ku dhisantahay Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed oo la socda ruuxa Kacaanka;

IYADDO LA ARKAY Sharciga Dhismaha Wasaaradda Arrimaha Dibedda, lam. 9 ee 8dii Sebtember 1971, iyo Sharciga lambarkiisu yahay 36 ee 26kii Abriile 1973 (Foreign Service Law);

IYADDO LA ARKAY Sharciga ay ku Dhissantahay Dawladda, Sharci lambar 14 ee 3dii Juunyo 1962;

IYADDO LA TIXGELINAYO Talooyinka ay soo jeedisay Wasaaradda Arrimaha Dibedda.

AMARXEER

Qodobka 1aad

Waxaa la guddoomiyey in la furo Safaarad Soomaaliyeed, Saldhig-geeduna ahaandoona Jamhuuriyadda Kuuba.

Muqdisho, 6 November 1975.

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY

Diiwaanka lamb. 5, bogga lamb. 176.

Muqdisho, 19 Nofembre 1975.

Hantidhawraha Guud

G. Dhexe Cabdillahi Warsame Nuur

XEER L. 160 ee 6 Nofembre 1975.

Magacaabid Danjire Cusub Jaalle G. Sare Yuusuf Xasan.

MAXDAWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

IYADOO LA ARKAY Xaashida 1aad ee Golaha Sare ee Kacaanka oo u wareejineysey Mamulka Sharciga, Dawladda iyo Qawaaniinta Dalka;

IYADOO LA ARKAY Sharciga ay ku dhisantahay Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed oo la socda ruuxa Kacaanka;

IYADOO LA ARKAY Sharciga ay ku dhisantahay Dawladda Sharci lamb. 14 ee 3dii Juunyo 1962;

IYADOO LA ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 56 ee 26kii Abriile 1973, (Foreign Service Law);

AMARXEER

Qodobka 1aac

Jaalle G. Sare Yuusuf Xasan Ibrahim, waxaa lagu magacaabay Danjire Soomaaliyeed; saldhiggisuna noqon doona Magaalada Hafaana ee Jamhuuriyadda Kuuba.

Muqdisho, 6 Nofembre 1975.

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

Xoghayaha Dawladda
ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda

Cumar Carte

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY

Muqdisho, 19 Nofembre 1975.

Diiwaanka lamb. 5, bogga lamb. 175.

Hantidhawraha Guud

G. Dhexe Cabdillahi Warsame Nuur

XEER L. 161 ee 6 Nofembre 1975.

Mogacaabid Danjire Jaalle Baasi Maxamed Suufi.

MAXDAWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

IYADOO LA ARKAY Warqadda 1aad ee Golaha Sare ee Kacaanka oo u wareejineysey Maamulka Sharciga Dawladda iyo Qawaaniinta Dalka; IYADOO LA AKRAY Sharciga ay ku dhisantahay Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya oo la socda ruuxa Kacaanka;

IYADOO LA ARKAY Sharciga ay ku dhisantahay Dawladda, Sharci Lambar 14 ee 3dii Juunyo 1962;

IYADOO LA ARKAY Sharciga lambarkiisu yaha 36 ee 26kii Abriile 1973, (Fireign Service Law);

AMARXEER

Qodobka 1aad

Jaalle Baasi Maxamed Suufi F. N. 2474, Darajadiisuna tahay A-3 P. N. 4-2001; horeyna u ahaa La-Taliyaha Safaaradda J.S.D. ee Lusaaka, waxa lagu magacaabay Danjire Soomaaliyeed oo saldhigiisuna ashandoona Magaalada Triiboli.

Qidobka 2aad

Xilka loo magacaabay, waxuu ku haydoonaa isla Darajadiisu (A-3); sida uu qorayo Qodobka 25aad ee Sharciga lamb. yahay 36 ee 26kii Abriile 1973.

Muqdisho, 6 Nofembre 1975.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

Xoghayaha Dawladda
ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda

Cumar Carte

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY

Diiwaanka lamb. 5, bogga lamb. 174.

Muqdisho, 19 Nofembre 1975.

Hantidhawraha Guud

G. Dhexe Cabdillahi Warsame Nuur

BOGGA SEDDEXAAD

TALOOPYIN ISGARSIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

FIAT SOMALIA — S. p. A.
Hantida Shirkadda Sh. So.1.700.000,00
Xarunta Xamar

OGEYSIIS SHIR

Waxaa la ogeysiinayaa in Shirka aan Caadiga ahayn ee dadka ku jira Shirkadda FIAT Somalia S.p.A. lagu qaban doono FIAT S.p.A. Corso Marconi, 10-20 Torino, markay taariikhdu tahay 22-12-1975 saacaduna tahay 9ka, isu imaatinka hore iyo markay taariikhdu tahay 23-12-1975 isla sagaalka (9ka), isu imaatinka 2aad, si looga doodo ajendada soo socota:

— Dheereynta muddada shirkadda ilaa 31-12-1999 iyo beddelaada Qod. 3aad ee Xeerka (Statuto).

Muqdisho, 30 Nofembre 1975.

HAL MAAMULE
Dott. Ezio Schierano

(292 Bis)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHHA MAXKAMADDA

HADDUU arkay dacwada hor ku qoran;

HADDUU arkay waxa ay ku saabsan tahay iyo ogeysiiski Bankiga (Eeg warq. lam. 1841) Ganacsiga Ummadda Laanta sedexaad, wuxuu ogaaday in ay tahay Shaqadiisa;

HADDUU arkay qod. 69 D. L. 9-9-65 n. 2;

WUXUU CADEYNAYAA

Lumidda buugga keydka lam. 1426-4 oo ay ku qoran tahay lacag dhan Shs. 1.015 (kuntobanshan) iskana lahaa Jaalle Maxamed Ibraahim Cabdulle;

WUXUU AMRAYAA

In buug keyd cusub loo sameeyo Jaallaha kor ku magacaaban, 30 maalmood ka dib marki Amarkan lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In buug keydka cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Maxamed Ibraahim Cabdulle, ama qof isla asagaas wakiil kaga noqon kara si Sharci ah, ayadoo la sugaayo 30ka maalmood ee kor ku tilmaaman.

Xamar Tr. 3 Dishembre 1975.

GARSOORAHA MAXKAMADDA

Cabduraxmaan Sheekh Maxamed

(292 Bis)

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER EE BURCO

XUKUN DEECRE

MARKII AAN ARKAY Arjiga Dacwootada Faaduma Cali Maxamed oo sheegatay in laga xaday jeeg wareega Lamb. 7351 kuna qornayd 2.000 (laba kun shilin) oo Bankiga Burco ka soo baxaday 26-6-75, codsanaa tayna in loo celiyo lacagtaas.

MARKII AAN ARKAY warqadda Summaddeedu 03099 oo ka timid Bankiga Ganacsiga Laanta Burco oo ay hubiyeen in Jeegaasu jiro.

MARKII AAN HUBIYEY in dacwootada ay doodeedii runtahay, isla markaas aan arkay qod. 27 ee Xeerka Lamb. 2 sona baxay 9-9-1965. Ayaan guddoonshay in Jeega summaddiisu 7351 la baabiiyo Bankiga Ganacsiga u celiyo Faadumo Cali Maxamed lacagta ku qornayd Jeegaas. 30 casho ka dib marka lagu qoro Faafinta Rasmiba ah, kharajkana Dacwootadu iska bixiso.

Maanta oo taarikhdu tahay 25-11-1975.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Togdheer

Dr. Cabdiraxmaan X. Maxamuud

(292 Bis)